Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad
Documentiga Kalfadhiga 7-aad kulankiisa:19-aad Tr:12.12.2015

Kalfadhiga 7-aad

Kulankiisa:19-aad, Sacada furitanka.11:58 gh, Sacada Xiritanka.1:35 gd.

Guntinta:147 xildhibaan

Ajendaha:-

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka

2.Ansixinta Ajendaha

3.U Codeynta Sharciga Iibka,Qandaraasyadda iyo Dheef-Wadaagga Qaranka

4.Doodda Sharciga ka hortagga lacag dhaqidda iyo Maal-gelinta Argagixisada

5.Qeybinta Warbixinta Guddiga Warfaafinta ee akhrinta 3-aad sharciga saxaafadda

6.Qaybinta Taariikh Nololeedka Guddiga Madaxa-bannaan ee adeegga Garsoorka.

Shir-Guddoomiye,Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federalka

Mudane:Jeylani Nuur Iikar

1.Waxaa shirka furay Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane:Jeylani Nuur Iikar waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uu akhriyay Xildhibaan:Sheekh Shaacir.

2.Guddoomiyaha Golaha,wuxuu xildhibaanada uu u soo jeediyay in ay ansixiyan ajendaha manta xildhibanada wey ansixiyan ajendaha.

Xildhibaan:Aadan Sadiiq,Toosin,waxaan u qaatay toosintan xalay Ajendaha naloo soo diray waxaa ku jiray Maxkamada Dastuuriga manta kuma jirto Ajandaha.

Guddoomiye Ku xigeenka 1aad Mudane:Jeylani Nuur Iikar,wuxuu sheegay, waxay ahayd inuu yimada Guddoomiye Jawaari,uu shir Guddoomiyo manta wuu mashqulay wuxu yiri dib halaigu dhigo sidaas ogada.

3.Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur Iikar, wuxuu sheegay mudanayaal waxan u codeynayna Sharciga Iibka Qandaraasyadda iyo Dheef-Wadaagga Qaranka, inta ogol gacanta ha taagto.

Codeyntii Sidan ayay u dhacday

Inta Ogol _____ 143 Xildhibaan

Inta Diidan_____ 3 Xildhibaan

Inta ka Aamustay_____ 1 Xildhibaan

Guddoomiye ku xigeenka 1-aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur Iikar,wuxuu ku dhawaaqay Codkii loo qaaday Sharciga Iibka Qandaraasyadda iyo Dheef wadaaga Qaranka waa Ansax.

Xildhibaan:C/laahi Sheikh Ismaaciil,wuxuu soo jeediyay,wixii Qaraar ahaa ee dalkaan laga ansixiyo wax ka hirgalo majiraan xildhibaanada markasto wax bay ansixiyan, lacagta ka timado Basabooradda jeebka ayaa lagu shubta waa in la kontarola, mudanayaal sharciga inta hartay an ansixino.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay, guddiga maaliyadda waa in uu daba gala wasiirka sto hadii ay sameyn wayan howlihi shaqo waa in xukuumadana loo sheego hadii ay wax ka qaban weyso, waa in aad Golaha ku soo celisaan.

Xildhibaan:Samaan Sheekh Daahir,wuxuu sheegay,Qaraar Barlamaan ee la xiriira bilaha Janayo iyo May, dakhli iyo qarash oo dib naloogu soo celiyay oo Barlamaan ah wali ma heyno Hanti Dhowrka shaqadii uu qabsan lahaa gacmaha ayuu ka xiran yahay, arrinta barlamaan hore ee la yiri waa la bixiyay wali ma heyno Hay'ad bartay wali ma arag,warbixinta Concoraef maba daba gali karno.

Xildhibaan:Cabdi Risaaq Jurile,wuxuu soo jeediyay,arrimaha xasaasiga in shacabka aynu masu'lka ka nahay ay na maqlan ayna ogaadan waa qaceena, guddiga maaliyadda oo hada ka hadlay arrintan masu'liyada dalka ah in guddiga maaliyadda ay u qabtan waqti qofkii waajib kiisa guddan waayo la ogeysiiyo xukuumada,waxan soo jeedinaya in guddiga maaliyadda ay keenan Barlamaanka waqti mucayin ah,guddiga maaliyadda talaabadii uu ka qaadi lahaa

Hay'adaha in uu soo saaro.

Xildhibaan:Daahir Aamiin Jeesow,wuxuu sheegay,shuruucda la hakiyay oo Xukuumada hakisay wax shaqo ah kuma lahan,hakinta warqad ka soo baxday xukuumadda oo ah sharci mar hore la qeybiyay,sharciga maalgashiga shishiye oo la yiri waa la hakiyay CV shirkadihii iyo Bankigii iibsan lahaa wey dhaxtagan yihiin, waxaan dooneyna in banaanka loo soo saro waa codsi.

Xog'hayaha Baarlamaanka Ckariim Xaaji Buux,wuxuu sheegay, shantii CV ee la hakiyay waa Rai'salwasere Cabdiwali Sheekh Axmed, tii maalintii Dhaweynt la hakiyay waa sharcigii Maxkamada Dastuuriga.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,halkan waxaa ka baxay Hanti Dhowrka,Ganacsiga oo ku maqan Madaxweynaha wixii dhinacaas ku maqan waa in qoraal loo qoraa oo la soo dadajiyaa.

Xildhibaan:Cabdi Xaashi C/laahi,wuxuu sheegay,Barlamaanka dhaliil weyn ayaan u qabna 12:00 duhurnimo in aan halkan shaqo ka bilowno, shaqada waa in ay la yima 9:00 aroorti dalka wuxuu u baahan yahay in aan howl badan u qabano, Madaxweynaha Dastuurka kuma qorna side labo arin u soo jeediyay Baarlamaanka ayay u taala, waa in uu Digreeto uu ku soo saara laakiin ma maheysan karo waraqaha loo gudbiyo markii shir jiro shacabka dhib ayay nagu qaban oo jidadkii oo dhan waa laga xiray.

Xildhibaan:Xuseen Carab Ciise,wuxuu soo jeediyay,guddiga maaliyadda in waqti la siiyo, tan Baarlamaankii hore web sedka ayaa lagu soo qoray meel walba ayay taala waa in la soo cadeya cidii la siiyay Barlamaankii hore oo manta la soo saro.

Xildhibaan:Cabdalla Boss Axmed,wuxuu sheegay,waxan ayidaya hadalkii Xildhiban:Jurille uu soo jeediyay,waa in 3 maalin loo qabta, guddoonka in dadka ku xantan oo ah wixii la doonayo in hoos loo dhigo, Baarlamaankii hore in la iibsaday,guryihii Bankiga Dhexe oo ah 54 guri oo la iibsaday oo dadkii howlgabka la siiyay waagii dowlada dhexe ku jiray waa laga saray waa in Guddoonka war cad ay soo hordhigaan Golaha Shacabka.

Xildhibaan:Ruush,wuxuu soo jeediyay,anaga waxaanahay sharci dajiyayaal Dastuurka ayan u fadhina, shirarka hada socda waxaan u xilsaaranay 25 xildhibaan waa in ay shaqeyan oo ay wax walba soo saran,waxay shegan 25 xildhibaan in ayna dhici Karin hal cod hal qof,Raisalwasaarihi hore waa uu joojiyay Maxkamada Dastuuriga wuxuu yiri waa in la hakiya sharcigan inta xukuumada ka soo hagaageyso sanadkii 2014ka.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,mudanayaalka adbay u mahadsanyihiin sida qiirada leh ay u muujiyan dareenkooda,wax yaabaha websat ka laga soo akhriyay wax micno ah ma sameynayso hala soo baro ha la soo ogaado gudddiga maaliyadda waa in ay dabagal sameyan

Dareenkiina marka ay soo cadaato Barlamaanka ayaa lagu soo celinaya.

Xildhibaan:Shariif Maxamed Cabdalla,wuxuu sheegay,hantidii dowlada laheyd dhowr Hay'ad ood ayaa lagu wareejiyay barlamaankii hore isagana waa kamid, madama ay isku qabsaden hantida qaranka wasaaradaha waa in la kala bixiyaa,wixii xafiisyo dowladeed waa in la habeya.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu sheegay,Xildhibanada ka doodayo sharciga lacag dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada, hala soo qoro.

Xildhibaan: C/laahi Sheekh Ismaaciil,wuxuu soo jeediyay, sharcigaan aad buu muhiim u yahay wuxuuna tabanaya dhaqaalaha dalka, waxaan qabaa wixii looga hortagi lahaa in la sameyo sidii kacaankii hore oo kale musuq-maasuqa qaabkii loo xakameyn karo qofkii sharciga ku xad gudba in maxkamad la sarayo, Kenya waligeed malaheyn haday yeelatay maxkamadaas.

Xildhibaan:Cabdi Xaashi C/laahi,wuxuu sheegay, dalkan lacag malahan dolar ayaa lacag nalooga dhigay marka hore in aan ka hadalno sidii aan u sameysan lahayn lacag shilin soomaali hadii aan helno lacag waan helayna in aan la dagaalano lacag dhaqidda,waxaa nalagu wareeriyay Dolar EVC, yaa maalgaliya Argagixisada markan lacag sameysano ayuu sharcigan na anfacaya.

Xildhibaan:C/laahi Jaamac Xuseen,wuxuu soo jeediyay,sharcigan waa muhiim waa caalami hishiisyada dowlada gashay qaab lagu kontarolo malahan garsoorkii ma dhisna markii aad fiiriso waa iska hor imanayan arrintan waa mid mustawaheena ka sareyso wadamada kala ah Soomaaliya,Congo,Ertria,Jaad, ma saxiixin waa sumad lawayaal sharcigan cid kontaroli karto majirto dibada ayuu ka yimid.

Xildhibaan:Maxamed Cabdulle Gesay,wuxuu sheegay,waxan ayidaya xildhiban:cabdi Xaashi dalkan lacag ayuu leeyahay waa in ay xukuumada sidaas ogaata, waa in sida ugu dhaqsiyaha badan loo sameya lacag, Barlamaanka waa 275 xildhibaan aaway ma fadhiyan waxay la mid tahay qiyano, markan wada fadhino ayan shacabka wax u sheegi karna, waxan u joogna xuquuqda dalka iyo dadka inaan ilaalino,waxa shaqada la fura 1:00 duhurnimo Gorman shaqeynayna waqtigii la xiri laha hadii an fureyno, dhaqankan socda mahan mid umada anfacaya mudanayaal aan shaqeyno.

Xildhibaan:Shariif Maxamed Cabdalla,wuxuu soo jeediyay,sharcigaan waxaad mooda in uu ka soo hormaray waqtigiisa dal aan lacag laheyn, dhaqaalo haysan, Bankiyada jira oo shaqeya waa birayfat wali lama gaarin hadii la ansixin wayo wuxuu awood siinaya suuqa madow ee xili aan loo bahnayn ayaa la soo jeediyay.

Xildhibaan:C/laahi Axmed Coonka,wuxuu sheegay,guddiga waa soo shaqeyay laakiin waqtiga da lama gaarin dadka dibadaha ka soo xawila lacagaha waa loo diiday hadii la dabagalo waxaa

imaanayo wareer badan hada diyaar uma nihin sharcigaan wadamada musuq-maasuqa kow ayan ka nahay lacagta manta la isticmaalo hadii ay noqoto lacag madow dhamaan waxaan noqonayna in qof qofkale wax siin Karin, waxan soo jeedinaya in guddiga dib ula noqdan inta waqti munasab ah la gaarayo.

Xildhibaan Maxamed Aamiin,wuxuu soo jeediyay,sharcigaan waa muhiim waa qaanuun been xalaalen wuxuu ka hortaga lacag been ah qof arki karto majirto,waxaa loo dhiibi karaa qof kale burcad badeedka cid si toos ah u arki karto ma jirto kaashkoda, qofka waa ganacsan kara qaa nuunkii ka hortagi lahaa waa sharcigaan money laundry maalgashada yaasha sharcigaan ayaa dabagali kara hay'ado ajnabi ah ayaan ka mid noqoneyna waa in dib loo akhriyo ka dibna loo codeyo.

Xildhibaan:Liibaan,wuxuu sheegay,sharcigaan waa muhiim waa in la fahmo arrinta loo sameyay waa dadka hantida dhaca iyo kuwa boobka sameya oo geysta dibada,sharcigaa waa in la hirgaliya waa international wadanka mahan mid hada dhashay Banki majiro inta laga gaarayo dhismaha Bangiyo, sharcigaan waa jiri jiray waa in la soo noolayaa.

Xildhibaan:Xamzo Sheekh,waxay sheegtay, in dadka qaarkood ay yiraahdan anaga ma shaqeyno waxaa idiin wanaagsan ninkii sidaa dhihi lahaa in uu iscasilo.

Xildhibaan:Yuusuf Macalin Cali,wuxuu soo jeediyay,lacag dhaqida waxay tahay dadka dambiila yaasha weyso xadan shacabkana waxay u muujiyaan in ay xalaal tahay, waa lacag qof soo xaday oo meel ku maal gashato oo ah musuq maasuq sharcigaan aan ansixino si aan ula mid noqono dowladaha ladagaalanka musuq-maasuqa.

Xildhibaan:C/laahi Xasan (Habdhowre),wuxuu sheegay,sharcigaan waa muhiim lacagta waad ogtihiin in mareykanka diiday xawaalada soomaalida waayo qof lacag soo xaday markii la daba galay ay noqoneyso musuq-maasuq lacagaha marka la dirayo oo ah xawaalada waxaa loo diraa mareykanka, soomaaliya waxay u baahan tahay manta ayaa la rabaa sidan ku heli lahayn.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay, doodii Hindise Sharciyeedka sidaas ayay ku soo gaba gabowday mudanayaalka waa in si wanaagsan loo soo akhriyaa, guddiga waxaan ka codsanaya soo jeedinta xidhibaanada guddiga waa in uu soo ururiyan.

Kalfadhiga 7-aad Kulankiisa:19-aad, uu shir Guddoominayay Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya Mudane:Jeylani Nuur Iikar, uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 1:35 gd.